
# Miisaaniyadda Muwaadinka 2025

## DOWLADDA HIRSHABELLE SOOMAALIYA



# Miisaaniyadda Muwaadinka ee Sanadka 2025



Dowladda Hirshabelle waxay soo saartaa miisaaniyadda muwaadinka si dhammaan muwadaaninita u helaan xogta misaaniyadda dowladda.  Waaxda Miisaaniyadda iyo Waaxda Dhaqaalaha ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa iska kaashada diyaarinta miisaaniyadda muwaadinka. Ujeedka diyaarinta miisaaniyadda muwaadinka waa in muwaadiniinta ogaadaan qaybaha ugu muhiimsan ay miisaaniyadda dowladda ka kooban tahay oo ay ka mid tahay odoroska dakhliga iyo kharshaadka oo faahfaahsan, sidoo kale maashaariicda horumarineed ee sanadka 2025. Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda waxay ka tarjumeysaa siyaasadda Dowladda Hirshabelle taas oo waafaqsan qorshaha horumarinta dowladda oo ujeedkeedu yahay in la hormariyo xaaladda nololeed ee muwaadiniinta.

**Waa Maxay Miisaaniyadda Dowladda?**

Miisaaniyadda Dowladda waa qorshe dhaqaale oo muujinaya odoroska dakhliga iyo kharasha dowladda ee sanadka soo socda. Waxaa loo sameeyay sida shax muujinaysa qaabka lacagaha dadweynaha loogu qoondeeyo qaybaha kala duwan sida waxbarashada, caafimaadka, kaabayaasha dhaqaalaha iyo amniga bulshada.

Miisaaniyadda Dowladda waxaa inta badan loo diyaariyaa qaab iskaashi ah oo ay ka qayb-qaadanayaan waaxyaha kala duwan ee Dowladda waxaana ansixiya golaha sharci dejinta dowladda. Wax ay door muhiim ah ka qaadataa maamulka iyo maareynta dhaqaalaha iyadoo saameyn ku leh siyaasadda dowladda iyo adeegga la siinayo muwaadiniinta.

# Qaybaha Muhiimka ee Miisaaniyadda 2025

**Maalgashiga Aadanaha**

# Qaybaha Muhiimka ah ee Miisaaniyadda 2025

## Maalgelinta Aadanaha

Dowladda waxaa ka go'an horumarinta khayraadka aadanaha waxaana miisaaniyadda 2025 ku jira mashaariic muhiim u ah maalgashiga aadanaha.

**Waxbarashada**: Mashruuca Horumarinta Aadanaha ee Soomaaliya ayaa $3.2 milyan u qoondeeya Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Hirshabelle iyadoo ujeedada tahay in la kordhiyo helitaanka adeegyo waxbarasho.

**Caafimaadka**: DAMAL CAAFIMAAD waa mashruuc muhiim ah oo leh miisaaniyad qiyaastii ah $229,750, kaas oo taageeraya Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada si loo horumariyo bixinta adeegyada caafimaadka iyo xoojinta nidaamyada caafimaadka.

**Maalgashiga Kaabayaasha, Beeraha iyo Horumarinta Dhaqaalaha**

- Miisaaniyadda Dowladda ee sanadka 2025 waxay ka koobantahay mashaariicda horumarineed ee soo socda:
- Mashruuca Adkaysiga Magaalooyinka Soomaaliya ($6.5 milyan) waa mid ka mid ah mashaariicda muhiimka ah, iyadoo ujeedadiisu tahay in la xoojiyo awoodda dowladaha hoose si ay u bixiyaan kaabayaasha adkeysiga leh, oo ay ku jiraan wadooyinka, iyo sidoo kale in la horumariyo bixinta adeegyada magaalooyinka.
- Mashruuca Barwaqo oo leh miisaaniyad qiyaastii ah $2 milyan wuxuu leeyahay ujeedo ah in la horumariyo adeegyada biyaha, beeraha, iyo deegaanka ee bulshada ku nool dowlad goboleedka.
- Mashruuca Adkaysiga Biyaha ee Grandwater ayaa loogu talagalay miisaaniyad guud oo ah $640,600 si loo taageero Wasaaradda Biyaha in ay fuliso mashaariic siin doonta muwaadiniinta biyo nadiif ah.
- Mashruuca Adkaysiga Nidaamka Cuntada Soomaaliya ayaa maalgelinaya $3.4 milyan oo loogu talagalay barnaamijyada waraabka iyo horumarinta guud ee beeraha ee dowlad goboleedka.

**Xoojinta Hay'adaha iyo Kordhinta Dakhliga Gudaha ee Dalka**

- Miisaaniyadda 2025 waxay ka koobantahay mashaariic muhiim ah oo la xiriira dhisidda hay'adaha iyo xoojinta awoodda dowladda, oo ay ku jiraan dib-uhabaynta maamulka maaliyadda ee dowladda iyo mashaariicda kor u qaadista dakhliga gudaha, kuwaas oo ka imaanaya deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo hay'adaha horumarinta.
- Mashruuca Kordhinta Dakhliga ee uu Bangiga Adduunka ku maalgelinaya $1.8 milyan si loo horumariyo dakhliga, iyo sidoo kale horumarinta awoodda hay'adaha.
- Dowladda Hirshabelle ayaa sameysay horumar weyn oo ku saabsan kordhinta dakhliga gudaha si loo horumariyo bixinta adeegyada bulshada.

# Qaab-dhismeedka Siyaasadda Dhaqaalaha Miisaaniyadda

Jadwlaka Hoose wuxuu faahfaahinaya qiyaasaha muhiim ah ee dhaqaalaha ee gundhigga u ah qaab-dhismeedka miisaaniyadda 2025, iyadoo soo koobeysa isbadada wax-soosaarka gudaha iyo sicirka suuqa

| | 2021 | 2022 | 2023 | Proj 2024 | Proj 2025 | Proj 2026 | Proj 2027 | Proj 2028 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Nominal GDP (USD, billions)** | 9.839 | 10.42 | 11.68 | 12.804 | 13.891 | 15.059 | 16.31 | 17.638 |
| **Real GDP growth (% change)** | 3.308 | 2.433 | 2.8 | 3.7 | 3.9 | 4 | 4.1 | 4.3 |
| **Inflation, end of period consumer prices (% change)** | 5.667 | 6.056 | 6.601 | 4.3 | 3.7 | 3.5 | 3.3 | 3.1 |
| **Current account balance (% of GDP)** | -6.816 | -8.043 | -9.577 | -8.657 | -8.84 | -10.505 | -10.773 | -10.366 |

Somaliya wax ay gaartay heerka dhammeystirka habraaca deyn cafinta (HIPC Completion Point) bishii Diseembar 2023, taasoo u suurta galisay deyn cafin gaaraysa $4.5 bilyan. Tani waxay hoos u dhigtay deynta dibadda ee dalka oo ka ahayd 65% ee waxsoosaarka Gudaha (GDP-ga (sanadka 2018) ilaa 6% sanadka 2023. Waxaa la qiyaasayaa in taageerada ay Soomaaliya ka helayso bahwadaaggeeda horumarineed ay hoos u dhici doonto kadib dhamaystirka HIPC, sidaas darteed Soomaaliya waxay la kulmaysaa caqabadda ah in ay maalgeliso miisaaniyadeeda maaliyadeed iyo miisaaniyadda joogtada ah iyada oo ka bixinaysa dakhligeeda gudaha. Kororka celceliska GDP-ga dhabta ah ayaa ahaa wax ka yar 3% intii u dhaxaysay 2021-2023, waxaana la filayaa inuu wax yar kordho sanadaha soo socda.






Kororka dhaqaalaha Soomaaliya waxaa si weyn u hoggaaminaya qaybaha beeraha iyo adeegyada. Beeruhu waxay ka qayb qaateen in ka badan 60% ee GDP-ga muddadii ugu dambeysay ee tobankii sano (2011 – 2022), taasoo ka dhigaysa qeybta ugu weyn ee kororka dalka. Xoolaha ayaa ah qeybta ugu weyn ee gudaha qaybta beeraleyda, waxayna ka tirsan tahay ku dhawaad 40% ee GDP-ga. Heerka sicir-bararka ayaa la filayaa inuu hoos u dhaco marka loo eego heerarka sare ee 2021-2023 (xilli ay saameeyeen COVID-19 iyo sicir-bararka sare ee caalamiga ah sababo la xiriira dagaalka Ruushka iyo Ukraine). Maalgelinta dakhliga gudaha ee dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa horumar sameysay, laakiin dowlad goboleedyada federaalka ayaa la kulmaya hawl adag oo ah in ay daboolaan baahiyahooda kharash iyaga oo adeegsanaya dakhliga gudaha, maadaama deeqaha caalamiga ah ay hoos u dhici karaan sanadaha soo socda. Bangiga Adduunka ayaa saadaaliyay in isbeddelada dhaqaale iyo maalgelinta dadweynaha ee kordhaysa kadib dhamaystirka HIPC ay soo jiidan doonaan maalgelinta tooska ah ee shisheeye (FDI), taasoo dhiirrigelin doonta qaybta gaarka loo leeyahay. Soomaaliya waxay sii wadi doontaa inay wajahdo daciifnimo, khilaaf, iyo shokeetada cimilada, dhammaan arrimahan ayaa sii wadi doona inay saameeyaan kororka dhaqaale ee mustaqbalka. Hirshabelle waxay leedahay beero ku haboon beerashada khudaarta, dalagyada sisinta, digirta iyo qaro, sidoo kale xeebaha ee kalluumeysiga, iyadoo sidoo kale jira wax soo saar xaddidan oo ari iyo xoolo kale (sida geela). Dowlad goboleedkani waa soo saaraha ugu weyn ee sisinta gudaha dalka, iyadoo lagu qiyaasay in 150,000 hektar ay ku jiraan wax soo saarka. Sido kale dalagyada waxsoosaarka waxaa ka mid ah galleyda, digirta, bariiska, iyo beeraleyda khudaarta. Hirshabelle waxay leedaahy qiyaastii 600 km oo ka mid ah wabiga Shabeelle, taasoo siineysa fursad weyn oo kaluumeysi iyo ganacsi.

## Dakhliga

Dakhliga gudaha ayaa la filayaa inuu ka noqdo 24% dakhliga guud ee miisaaniyadda 2025, halka

Hirshabelle's guud ahaan dakhliga miisaaniyadda 2025 waxaa la filayaa inuu gaarayo $40.1 milyan, iyadoo deeqaha ay ka qayb qaadanayaan 76% ka mid ah. Dakhliga ka imanaya ilaha gudaha ayaa la filayaa inuu gaaro $8 milyan sanadka 2025, taasoo muujinaysa koror dhan 15% marka loo eego sanadka 2024 si loo yareeyo deefka miisaaniyadda. Dakhliga canshuuraha ayaa si joogto ah u noqda ilaha ugu weyn ee dakhliga gudaha, waxaana canshuuraha alaabta iyo adeegyada ay yihiin ilaha ugu weyn ee dakhliga canshuuraha. Canshuurta cusub ee dakhliga iyo dib-u-habeynta lagu sameeyay maamulka canshuuraha ayaa la filayaa inay kordhiyaan dakhliga canshuuraha ee 2025 marka loo eego sanadkii hore.




## Kharashaka

Wadarta kharashaadka Miisaaniyadda 2025 waa $40.1 milyan (oo ay ku jiraan deeqaha dibadda). Sida shaxda hoose ay muujinayso, kharashaadka guud ee dowladdu waxaa loo qorsheeyay amniga, horumarinta adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka, iyo maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha ee muhiimka u ah Dowladda.

